
ADDYSG CYMRU
EDUCATION WALES
cenhadaeth ein cenedl | our national mission

Llywodraeth Cymru
Welsh Government

# Hagaha Manhajka Cusub ee Wales



Qoraalkan waxaa sidoo kale looga heli karaa 18 luuqadood bogga hwb.gov.wales

# Waxbarasho is bedelaysa



**Adduunyadu si joogto ah ayey isu bedeshaa waxaana u baahanahay fikrado cusub iyo adeegsi hal abuur leh oo tiknoolajiyad ah.**

Si looga hortago caqabadahaas, Dowladda Wales waxay dooneysaa inay hubiso in cunuggaagu leeyahay aqoonta, xirfadaha iyo waayo-aragnimada waxbarasho ee ay u baahan yihiin si ay noloshooda uga faa'iideystaan.

Macalimiinta iyo khubarada waxbarashada ee Wales oo dhan waxay ka wada shaqaynayeen sidii ay u horumarin **lahaayeen manhajka Wales**.



Iskuulka ilmahaaga, manhajka waxaa **dejinaya macallimiinta**. Waxa ay isticmaalayaan hagitaan ay macallimiin kale u qoreen si ay uga caawiyaan inay qorsheeyaan waxay carruurtu bartaan.



Manhajka waxbarashada waxaa loogu talagalay **dhammaan carruurta**. Waxay ku taageeri doontaa ilmahaaga casharro hal abuur leh oo macno ka leh nolosha dhabta. Waxay ku habboonaan doontaa baahidooda waxayna ka caawin doontaa inay gaaraan karti buuxda.



Dunidu waayadan dambe aad ayay isugu xiran tahay, markaa waxa ay bartaana sidoo kale wuu isku xiran yahay. Runtii aqoontu waa muhiim, waxaana sidoo kale la siin doonaa xirfada iyo waayo aragnimada ay uga baahan yihiin **adduun si degdeg ah isu badelaya**.

Iskuulkaagu wuxuu ka taageerayaa ilmahaaga inuu noqdo:


- arday hammi leh, karti leh, diyaarna u ah inuu wax barto inta uu nool yahay
- hindise leh, hal abuur curin leh, diyaarna u ah inuu qayb buuxda ka qaato nolosha iyo shaqada
- akhlaaq leh, muwaadin xogogaal ah, diyaarna u ah inuu ka qayb qaato Wales iyo aduunka, iyo
- caafimaad qaba, qof kalsooni leh, diyaarna u ah inuu hoggaamiyo nolol buuxda isagoo ah xubin bulshada ka tirsan oo la qiimeeyo.

Kuwaas waxaa loo yaqaana 'afarta ujeedo' ee manhajka.



# Maadooyinka la baranayo iyo khibradaha

Sidoo kale barashada akhriska iyo qoraalka, tirooyinka iyo xirfadaha dhijitaalka ah, waxa **jira lix qaybood oo maadooyinka la baranayo ah iyo khibradaha**. Wax kasta oo ilmahaagu barto waxa uu ku xirnaan doonaa maadooyinkan.




**Manhajka waxbarashadu wuxuu sidoo kale ka kooban yahay:**

- xuquuqda aadanaha
- kala duwanaanshaha iyo ixtiraamka kala duwanaanshaha
- khibradaha iyo xirfadaha shaqo iyo goobta shaqada
- barashada xaaladaha gudaha, qaranka iyo kuwa caalamiga ah
- koriinsha ahaan xiriirada habboon iyo waxbarashada galmada

# Maadooyinka la baranayo iyo khibradaha



**Dhishibiliinka Fanka**, ilmahaagu wuxuu baran doonaa fanka, qoob ka ciyaarka, riwaayadaha, filimada iyo warbaahinta dhijitaalka ah iyo muusigga si ay u horumariyaan xirfadahooda hal-abuurnimo, farshaxan iyo waxqabad.



Culuumta **Bani'aadamnimada** waxay ku baran doonaan adduunka, bulshada iyo dhacdooyinkii hore iyo kuwa hadda. Waxay baran doonaan caqabadaha iyo fursadaha ina soo food saara, iyo tallaabada anshaxeed ee aan ku ilaalin karno adduunka iyo dadkeeda mustaqbalka.




**Xisaabta iyo Tirooyinka**, ilmahaagu wuxuu horumarin doonaa fahamka tirooyinka iyo isticmaalka calaamadaha xisaabta. Waxay baran doonaan qaababka iyo cabbiraadda, waxayna baran doonaan tirakoobyada iyo ixtimaalka.



**Caafimaadka iyo Bad-qabka** waxay ku saabsan tahay ilaalinta caafimaadkooda jireed iyo maskaxeed oo ay ku jirto badqabka shucuureed. Waxay ku baran doonaan cunno caafimaad leh iyo sida aad uga badbaado internetka adoo oonlayn ah ama oflayn ah iyo sida aad ula macaamili karto saameynta iyo sida aad u hormarin karto xiriirada caafimaadka leh.



**Casharka Luuqadaha, Akhriska iyo Wada xiriirka,** ilmahaagu wuxuu ku baranayaa luuqado kala duwan. Waxay fahmi doonaan oo isticmaali doonaan Welsh, English iyo ugu yaraan hal luqad kale oo laga bilaabo dugsiga hoose. Marka lagu daro horumarinta xirfadahooda isgaarsiinta, waxay baran doonaan suugaanta, oo ay ku jiraan abuurista sheekooyinkooda, gabayada iyo bandhigyada.



**Sayniska iyo Tignoolajiyada** ilmahaagu wuxuu ku baran doonaa cilmiga bayoolajiga, kimisteriga, fiisigiska, iyo sayniska kombiyuutarka. Waxay baran doonaan wax ku saabsan naqshadeynta iyo injineernimada, noolaha, walxaha, xoogaga iyo tamarta, iyo sida kombiyuutarradu u shaqeeyaan.

# Maxaa Muhiima

Waxbarashada ilmahaagu waa inay diirada saartaa waxyaabaha iyaga quseeya hadda iyo marka ay koraan.

Maado kasta oo ay baranayaan iyo khibrada waxaa ku jira **bayaano ku saabsan waxa muhiimka ah** ee u qaabeeya waxbarashada carruurta da' kasta leh. Kuwani waxay ilmahaaga ka caawinayaan inuu ka fikiro waxa uu baranayo iyo sida mawduucyada ay iskugu xidhmaan, iyo xiriirka shaqada iyo nolosha guud ahaan. Waxay kaloo ku taageeraan ilmahaaga inuu horumaro sannad kasta markay dhisayaan fahamkooda iyo xirfadahooda.

Waxaa jira fursado badan oo ilmahaagu ku baran karo xirfadaha muhiimka u ah nolosha kuwaas oo ka caawin doona inay:

- qadarinta aduunka ku hareeraysan
- su'aalo weydiinta, raadinta cadeymaha, go'aano sameynta iyo xallinta dhibaatooyinka.
- barashada, is-gaarsiinta, sameynta qorshayaal iyo xal helida
- sameysashada adkeysi iyo maareynta bad-qabkooda
- la shaqeynta dadka kale iyo
- sameynta go'aanno ku saabsan xirfadaha mustaqbalkooda oo ku salaysan khibrado macno leh ee barashada, shaqada iyo hal-abuurka ganacsiga.

## Tusaale ahaan sida ay tani u shaqeyso

Dhinaca Sayniska iyo Tignoolajiyada ee barashada iyo khibradaha, mid ka mid ah bayaanada waxa muhiimka ah waa:

***'Dunidan inagu xeeran waxa ka buuxa noolayaal midba midka kale ku tiirsan yahay si uu u noolaado.'***

Inta uu ilmahaagu baranayo, siyaalo kala duwan ayay arrintan uga fikiri doonaan, sida tan:

- Waxa aan ogahay inay jiraan xayawaano dabar go'aya.
- Waxa aan fahamsanahay in waxa aan sameeyo ay saameyn ku leeyihiin deegaanka, dadka iyo duunyada.
- Waxa aan aqoonsan karaa siyaabaha lagu dhimi karo saameynta isbeddelka cimilada ee deegaanka, dadka iyo xayawaanka.

# Barashada hab u shaqeysa ilmahaaga

Manhajka waxbarashadu wuxuu kaa caawinayaa horumarinta aqoonta, xirfadaha iyo waayo-aragnimada ilmahaaga.

Waxay ay sameyn doonaan horumar iyagoo:

- wax badan baranaya
- fahamkooda arrimuhu sii qoto dheeraado
- xirfadahooda is-gaarsiineed ay koraan iyo
- xirfadahooduna kobcaan.

Waxaa jiri kara waqtiyo ay:

- si dhaqso leh hore ugu socdaan ama
- ay gaabiyaan si loo hubiyo inay fahmeen mawduuca ama sababtoo ah waxay ogaadeen wax iyagu xiiseeyaan.

Barashadu mar walba kuma xirna da'dooda. Umana dhici doonto si isku mid ah, ama waqti isku mid ah qof walba.

# Qiimayn

Qiimayntu waxay noqon doontaa qayb ka mid ah waxbarashada ilmahaaga maalin kasta.

Waxay la shaqayn doonaan macalimiintooda si ay u fahmaan sida wanaagsan ee ay u shaqaynayaan. Tani waa muhiim si loo caawiyo:

- fiirinta halka ay marayso waxbarashadoodu
- qorsheynta tillaabooyinka xiga ee waxbarashadooda
- ogaanshaha wixii arrimo ah ama caawimaada dheeraadka ah ee ay u baahan yihiin

iyo inay caawiyaan macalinkooda:

- helida habab aad ku carin karto iyo
- fiirinta sida wanaagasan ee ay ardaydu wax u qabanayaan.





**Iskuulku waxa kale oo uu kaala shaqayn doonaa si loo hubiyo in ilmahaagu haysto caawimada ay u baahan yihiin si ay horumar u sameeyaan.**

# U qalma mustaqbalka


Waxyaabaha uu cunugaagu wax ka barto 14-16 sano waxay ku xiran yihiin manhajka.

Mustaqbalka, iyo waliba aqoonta aan hada heysano, waxaa jiri kara maadooyin kale. Xirfadaha, Sinnaanta iyo Kala Duwanaanshaha iyo Gargaarka Degdegga ah.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aqoonta https://qualifications.wales/information-support/information-for-parents-carers/

Waxaa sidoo kale jiri doona noocyo kala duwan oo qiimeyn ah, tusaale ahaan, tignoolajiyada dhijitaalka ah ayaa la isticmaali karaa.





Waxaa ugu jira fursado adiga, ilmahaaga iyo bulshadaba si aad u caawiso horumarinta manhajka iskuulkaaga.

Si wada jir ah ayaa looga wada shaqeynayaa, dugsiga iyo guriga labadaba, waxa ay ka caawin doontaa ilmahaaga inuu helo waxbarashada ugu fiican oo ay u diyaariyaan mustaqbalka.

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan manhajka, weydii macallimiinta ilmahaaga.**

**Muuqaalka Luuqadda Dhegoolka Ingiriiska (BSL) ee carruurta, dhalinyarada iyo qoysaska ee ku saabsan Manhajka Wales iyo BSL ee ku jira manhajka** waxaa laga heli karaa kanaalka Waxbarashada Wales ee YouTube.

**Waxaad sidoo kale heli kartaa macluumaad dheeraad ah**

@WG_Education
@edubeginsathome

@EducationWales
@beginsathome